

WAR SAXAAFADDEED

Abril 8, 2020

Xiriirka Warbaahinta:

[Charles Boyle](#), 503-931-7773

Badhasaab Kate Brown wuxuu ka Dhigay Xiritaanada Dugsiga ilaa Dhammaadka Sanad Dugsiyeedka

(Portland, OR) — Iyadoo ay caddahay muhiimadda sii wadista kala fogaanta bulshadu muddada uu caabuga coronavirus uu ku faafay caalamka, gaar ahaan amarkeeda Guriga Joog, Nololo Badbaadi, Badhasaab Kate Brown waxay maanta ku dhawaaqday inay kordhinayso xiritaanada muuqda ee Oregon ee K-12 iyo nidaamyada waxbarashada ee dugsiga sare kadib ilaa dhammaadka teeramka waxbarasho ee wakhtiga iyo sanad dugsiyeedka. Waxay fartay degmo dugsiyeedyada, kuuliyadaha bulshada, iyo jaamicadaha inay dhammaystiraan toddobaadyada ugu dambeeya ee uga hadhay sanad dugsiyeedkii caadiga ah iyagoo sii wadaya waxbarashada onlaynka iyo taageerada ardayda.

“Ardayda Oregon ayaa ugu horreeya go’aan kasta oo aannu ka qaadanno waxbarashada,” ayey dhahday Badhasaab Brown. “Caafimaadkooda, farxaddooda, iyo badbaadadoodu waa mudnaantayada koowaad. Waxa ugu wanaagsan ee aannu u qaban karno caafimaadka carruurteenu, kumanaanka barayaal ee gobolka oo dhan ku sugan, waa inaannu hubanti siinno qof kasta annagoo ku dhawaaqayna maanta go’aanka kaasoo ah in la xiro fasalada ardaydu iskugu imanayeen inta ka harsan sanad dugsiyeedka. Dugsiga, iyo barashada, waxay u sii socon doonaan sida ugu fiican ee aannu karno annagoo isticmaalayna onlayn.”

Aqoonsiga in xiritaanada muuqda ee dugsiyadu ee xaaladaha aan hore loo arag ay si gaar ah u saamaynayaan siiniyeerada dugsiga sare ee Oregon, Waaxda Waxbarashada Oregon waxay maanta sii daysay [tilmaamo cusub](#) oo loogu talagalay dariiqyada loogu talagalay in siiniyeeradu ku qalinjabiyaan.

Hadalka Badhasaabka oo qoraal ah oo dhammaystiran waxa laga heli karaa [halkan](#).

Ka daawo fiidyowga shir saxaafadeedka Badhasaabka [halkan](#).

###